## Heshiis Dhexmaray Dawladda Federaalka Soomaaliya iyo Dawladda Puntland ee Soomaaliya

Garoowe, 14 Oktoobar 2014

**Horudhac:**

Waxaa booqasho qaadatay 10-14kii Oktoobar, 2014 ku yimid Puntland wafdi ka socda Dawladda Federaalka Soomaaliya (DFS) oo uu hogaaminayey Ra'iisul Wasaaraha DFS Mudane C/weli Shiikh Axmed. Wadahadal iyo wadaxaajood dhinacyo badan taabtay ee dhexmaray wafdiga Xukuumadda Federaalka iyo Xukuumadda Puntland, kadib, waxaa la isku raacay qodobada soo socda:

### 1. Dastuurka iyo Arrimaha Federaalka

#### 1.1. Doodda Puntland ee Qodobada la Bedelay.

Waxay Dawladda Federaalka Soomaaliya ka garaabaysaa doodda Dawladda Puntland ee ku aaddan wax ka beddelka Dastuurka, waxayna labada dhinac isku raaceen in arrintaas ay kawada hadlaan labada Baarlamaan ee Federaalka iyo Puntland, Xukuumadda Federaalkuna wadahadalkaas fududeyso.

#### 1.2. Dhamaystirka iyo Fulinta Dastuurka

Waxaa la isku raacay dhamaystirka iyo dardar-galinta Dastuurka Federaalka iyada oo loo marayo sida isla Dastuurku qabo, Cutubkiisa 15aad.

#### 1.3. Dhismaha Dawladaha Xubnaha ka noqonaya Dawladda Federaalka

- Dhismaha dawladaha ka mid noqonaya Dawladda Federaalka waa in uu ku salaysan yahay sida Dastuurku qabo.
- Dawladda Federaalka iyo Dawladda Puntland waxay isla qaateen in maamulka ku meel gaarka ah ee gobollada dhexe ee ay hoggaaminayso Dawladda

Federaalka uu ka kooban yahay Galgaduud iyo Koonfurta Mudug. Sidoo kale woqooyiga Mudug waxay ka tirsan tahay maamulka Puntland.

### 1.4. Dhismaha Ciidamo Qaran oo Ummadda ka Dhexeeya

Qodobkaas waxaa loo raacayaa sida ku xusan heshiiska Garoowe, 11kii Maarso 2013 oo ay wada saxiixeen Ra'iisul Wasaare Cabdi Faarax Shirdoon iyo Madaxweyne C/raxmaan Sh. Maxamed Maxamuud Faroole oo tibaaxaya "Dhisidda Ciidan Qaran oo isu dheelitiran iskuna dhafan, lagana soo qoro dhammaan gobollada iyo degmooyinka dalka"

## 2. Heshiisyadii Hore Loo Wada Galay

- Labada dhinac waxay isla ogalaadeen in heshiisyadii hore ay u wada galeen Dawladda Federaalka iyo Dawladda Puntland in ay yihiin heshiisyo ay waajib tahay in la fuliyo, iyada oo uu saldhig u yahay heshiiskii ugu dambeeyey ee ay wada saxiixdeen Dawladda Puntland iyo Xukuumaddii Ra'iisul Wasaare Cabdi Faarax Shirdoon (Saacid).

- Maaddaama heshiisyadii hore ay hirgali waayeen, waxaa lagu heshiiyey in fulinta iyo dabagalka heshiisyadii hore iyo heshiiskan loo xilsaaro guddi isku dhaf ah oo ka kooban labada dhinac (D.F.S iyo Dawladda Puntland), ayna ka qayb qaataan hay'adaha ay khusayso ee labada dhinac.

## 3. Wadatashiga Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Dowladda Puntland ee ku aaddan heshiisyada horumarineed iyo Heshiisyada Caalamiga ah

Dawladda Federaalka iyo Dawladda Puntland waxay isla qaateen fududeynta heshiisyada horumarineed iyo kuwa caalamiga ah, waxaana loogu dhaqmayaa sida ku cad Dastuurka Federaalka qodobadiisa 53aad.

## 4. Qaybsiga Deeqaha Caalamiga ah ee lagu helo magaca Soomaaliya

Guddiyada labada dhinac waxay ku heshiiyeen in si caddaalad ah loo qeybiyo dhammaan noocyada deeqaha magaca Soomaaliyeed lagu helo.

## 5. Higsiga ama Aragtida 2016 (Vision 2016)

- Waxay labada dhinac isla qaateen in aan ilaa iyo hadda wadatashi buuxa laga yeelan geeddi-socodka higsiga 2016.

- Waxay labada dhinac ku heshiiyeen in arrintaas wadatashi laga furo iyo sidii looga gudbi lahaa caqabadaha jira.

**6. Hantida Ummadda Soomaaliyed ee Dibadda ku Maqan**

Labada dhinac waxay isla qaateen in wixii hanti ah ee loo soo celiyo ummadda Soomaaliyeed si caddaalad ah loo qeybiyo, qaabka loo marayaana noqdo mid cad oo laga wada tashaday.

**7. Aqoonsiga Shahaadada Dugsiyada Sare ee Puntland**

- Shahaadada Puntland qaab ahaan waxay u ekaanaysaa midda ay bixiso Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta Dawladda Federaalka ee Soomaaliya, waxaana ku muujisan astaanta qaranka iyo magaca Dawladda Federaalka ee Soomaaliya, waxaa sidoo kale ka muuqata magaca Dawladda Puntland iyo Wasaaradda Waxbarashada iyo Tacliinta Sare ee Puntland.

- Dawladda Federaalka ee Soomaaliya waxay aqoonsan tahay shahaadada lagu heshiiyey ee Puntland.

- Dawaladda Federaalka ee Soomaaliya waxay u gudbinaysaa Dawladda Suudaan iyo ciddii kale oo loo baahdo qoraal lagu caddaynayo in Puntland qaaddo imtixaan midaysan oo Dawladda Federaalku aqoonsan tahay.

**8. Isu-Dheelitirka Jagooyinka Dawladda Federaalku Magacaabayso**

Labada dhinac waxay isla qaateen in jagooyinka iyo xilalka Dawladda Federaalku magacawdo, sida saraakiisha ciidamada, hawlwadeennada rayidka ah, xubnaha guddiyada madaxa bannaan, diblomaasiyiinta iwm loo magacaabo si caddaalad ah lana tixgaliyo saamiga haweenka.

**9. Hantida la kala Haysto**

- Waxaa lagu heshiiyey in arrintaas loo fuliyo sida ku cad heshiiskii 11kii Maarso 2013 Qodobka 6aad, Faqraddiisa 6.2 oo leh “waxaa labada dhinac ku heshiiyeen in DFS dedejiso isu celinta hantida gaar ahaaneed si loo helo dib-u-heshiisiin

dhab ah, iyadoo loo magacaabayo guddi heer qaran oo madax-bannaan, go'aamadiisuna yeeshaan awood fulineed."

## 10. Qaabka Wadashaqaynta Dawladda Federaalka iyo Dawladda Puntland

Waxaa la isla qaatay in sida ugu wanaagsan ee ay u wada shaqayn karaan Dawladda Federaalka iyo Dawladda Puntland ay tahay sida ku cad heshiiska 11kii Maarso 2013 qodobkiisa 1aad oo u qoran sida soo socota:

**Kor-u-Qaadista Kalsoonida iyo Xiriirka DFS iyo Dawladda Puntland :**

1.1. In la wanaajiyo xiriirka iyo wadahadalka madaxda sare ee labada dawladood la isna dhaafsado booqashooyin, lana ilaaliyo Protocol ka dowliga ah.

1.2. In la dhiirigaliyo wadashaqaynta hay'adaha kala duwan ee Puntland iyo Dowladda Federaalka.

1.3. In la dhaqan gelliyo dhammaan heshiisyadii dhexmaray Puntland iyo dawladihii KMG ahaa wixii aan ka hor imaanayn Dastuurka.

1.4. Ilaalinta iyo ku dhaqanka Dastuurka Federaalka.

1.5. In la joojiyo lagana hortago wax kasta oo wax u dhimi kara xiriirka iyo wadashaqaynta labada dhinac, wixii tabasha ahna lagu xaliyo wadahadal.

## 11. Qodobada iyo Ajendeyaasha aan ku jirin heshiiskan oo ay Puntland soo gudbisay

Labada dhinac waxay ku heshiiyeen wixii qodobo ama ajende ah ee ay Puntland soo gudbisay oo aan ku jirin heshiiskan in ay noqdaan kuwo looga wadahadlo fadhiyada soo socda ee labada dhinac yeelan doonaan.

## 12. Soo Af-jarista khilaafka labada dhinac

Heshiiskani wuxuu soo af-jarayaa wixii khilaafaad ahaa ee u dhaxeeyey labada dhinac, wuxuuna daahfurayaa is-afgarad, wada-shaqeyn toos ah iyo iskaashi lagu xaqiijinayo danaha qaranka Soomaaliyeed iyo horumarinta geedisocodka dowladnimada Soomaaliyeed heer federaal iyo heer dowlad-goboleed.

-----------------------------------------------DHAMAAD-----------------------------------------------

**Magacyada saxiixayaasha heshiiska labada dhinac**

Cabdiweli Shiikh Axmed Maxamed
Ra'iisal Wasaaraha Dawladda Federaalka Soomaaliya

______________________________

Dr. Cabdiweli Maxamed Cali Gaas
Madaxweynaha Dawladda Puntland

______________________________

**Markhaati/ Goobjoog**

Mahad Cabdalla Cawad
Gudoomiye ku xigeenka 2aad ee Baarlamaanka Soomaaliya

Siciid Xasan Shire
Guddoomiyaha Baarlamaanka Puntland

Ambassador Nicholas Kay
Wakiilka Xog-Hayaha Guud ee Qaramada Midoobey ee Soomaaliya

Ambassador Maxamed Cabdi Afey
Wakiilka gaarka ah ee Urur Goboleedka IGAD u qaabilsan Soomaaliya

Ambassador Michele Cervone d'urso
Wakiilka gaarka ah ee Midowga Europe u qaabilsan Soomaaliya.

Ambassador Wondimu Asamnew
Safiirka Itoobiya u fadhiya Soomaaliya iyo Gudoonka IGAD